# MAQAALKA SADDEX BILOODKA AH EE JOOJINTAGUDNIINKA HABLAHA



**Ururada Xubnaha ka ah NAFIS waxay u midaysan yihiin inay cidhib-tiraan Dhammaan Tacadiyada Jinsiga ku salaysan ee uu ka mid yahay Gudniinka Habluhu.**

NAFIS NETWORK 2024 Vol.3

# DOORKA SIYAASAD-DAJIYAYAASHA EE ANSIXINTA SIYAASADDA GUDNIINKA HABLAHA EE SOMALILAND.




Siyaasad-dejiyeyaasha Somaliland iyo dhiggooda Afrika iyo dalalka jaarka la ah waxay door weyn ku leeyihiin dejinta iyo hirgelinta xeerarka caalamiga ah iyo hab-maamuuska u dooda xuquuqda haweenka iyo carruurta adduunka. Gudniinka hablaha kaliya ma joojin karaan sharciyo lagu qoray warqad balse waxaa jira habab kale oo wax ku ool ah oo ay tahay in la isticmaalo si loo gaadho cidhibtirka Gudniinka Hablaha, kuwaas oo ay ka mid yihiin in haweenka lagu dhiirigeliyo dhanka horumarka sida, waxbarashadda, dhaqaallaha iyo habab cusub oo lagu beddelo gudniinka hablaha. Maadaama waxbarashaddu qaabayso hab-nololeedka bulsho waa in kor loo qaado ogaalka iyo wacyiga bulshadda ee saameynta dhibaato iyo waxyeelo ee uu u leeyahay gudniinku hablaha, haweenka iyo bulshaddaba.

Siyaasad-dejiyeyaasha ayaa kaalin weyn ka qaadan kara diyaarinta siyaasaddaha lagu cidhibtirayo gudniinka hablaha, maadaama ay haystaan fursadda ay isugu yeedhi karaan dhammaan dhinacyada ay khuseyso si ay ugala hadlaan diyaarinta siyaasad wax ku ool ah. Waxa kale oo ay awood u leeyihiin inay ka baaraandegaan ansixintiisa sababtoo ah waxay si fudud u geli karaan golayaasha (Golaha Wasiiradda iyo Baarlamaanka). Waxa kale oo ay abuuri karaan jawi suurtagelinaya in lagaga doodo siyaasadda ku habboon ee khuseeysa xaaladda Somaliland.

Sida ku cad qodobka 36-aad ee dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland dawladdu waa in ay la dagaalanto dhaqamada ka soo horjeeda xuquuqaha iyo xoriyaadka aasaasiga ah ee haweenka Somaliland iyada oo soo saaraysa habab sharci oo xakamaynaya dhaqamada aan wanaagsanayn, si gaara qodobkan faqradiisa 2aad waxay sheegaysaa sidan: "Xukuumaddu waa inay dhiirigelisaa, xeerna kasoo saartaa xaqa ay haweenku u leeyihiin inay ka xoroobaan dhaqamada aan shareecada waafaqsanayn ee waxyeellada u leh jidhkooda iyo damiirkooda".

Somaliland Goleyaasha Sharci-dejinta iyo Golaha Wasiirrada labbaduba waxay awood u leeyihiin inay sharci dejiyaan ama ay abuuraan siyaasad iyo hannaan sharci oo qaran sida uu si gaar ah u qeexayo dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Awoodaha dastuuriga ah ee noocan oo kale ah waxay u oggolaanayaan inay bilaabaan, dejiyaan, sharciyeeyaan, ansixiyaan iyo inay hirgeliyaan Siyaasadda Qaran iyo qaab-dhismeedka sharci ee la xidhiidha gudniinka Hablaha. Waxa kale oo ay awood u leeyihiin inay u

qoondeeyaan dhaqaale ku filan abuurista iyo hirgelinta siyaasaddaha iyo qaab-dhismeedka sharciyeed sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland 2001.

Wasaaradda Shaqo Gelinta, Arrimaha Bulshadda, iyo Qoyska ee Somaliland iyadoo tixraacaysa xaqa uu u damaanad qaaday dastuurka JSL waxa ay bilawday dejinta siyaasadda qaranka ee cidhibtirka gudniinka Hablaha Somaliland markii ugu horreysay taariikhda Somaliland oo ahayd horraantii 2014. Bilowgii siyaasaddan waxay barbilow wanaagsan u noqotay in laga jawaabo baaqyaddii iyo cadaadiskii hay'addaha maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahi ay kaga dalbanayeen xukuumadda sannado badan in la sameeyo Siyaasad Qaran iyo hannaan sharci oo ka hortagaya gudniinka Hablaha ee Somaliland. Si kastaba ha ahaatee siyaasaddan ka dhanka ah gudniinka Hablaha ayaa ah mid aan wali la ansixin balse waa astaan wanaagsan oo muujinaysa sida ay uga go'an tahay xukuumaddu inay meesha ka saarto dhaqamada aan wanaagsanayn ee muddada dheer ka soo horjeeday shareecada islaamka iyo dastuurka JSL.
Waxa jira talooyin wax ku ool ah oo ay siyaasad-dejiyayaashu raaci karaan si loo ansixiyo siyaasadda lagu joojinayo gudniinka hablaha ee Somaliland sida:- In la tixraaco oo la ogaado waxa diinta islaamku ka tidhi gudniinka hablaha iyadoo wax laga weydiinayo culimadda diinta, sidoo kale in la akhriyo oo la tixraaco waxa dastuurku JSL ka sheegay dhaqamada aan shareecada waafaqsanayn sida (Qodobka 36aad ee dastuurka Somaliland ), in cilmi-baadhis lagu sameeyo sida dawladaha kale ay u cidhibtireen gudniinka Hablaha, iyo in wada-tashi lala yeesho Golayaasha Xeer-dejinta, Ururadda Bulshadda Rayidka ah, Xirfadlayaasha Caafimaad iyo Adeeyaasha bulshadda taas oo suurtagal ka dhigaysa in si waddajira looga hawlgalo sidii loo lafa-gurilahaa saameynta taban ee gudniinka habluhu ku leeyahay bulshadda guud ahaan iyo gaar ahaan hablaha iyo haweenka Somaliland, meeshana looga saari lahaa dhammaan caqabadaha ku gadaaman ansixinta Siyaasadda Qaran ee joojinta gudniinka hablaha

Markale Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska waxay dedijisay Siyaasadda Qaran ee ka-hortagga gudniinka Hablaha oo ay tahay in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada si ay u ansixiyaan, haddii ay sidaas ku ansixiyaana waxay wax ka tari doontaa sidii looga takhalusi lahaa samaynta gudniinka hablaha kuwa lagu helo inay ku dhaqmayaanna si adag ayaa loo ciqaabi doonaa.
Talo ahaan, Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ee Somaliland waa inay ku cadaadiyaan inay dedejinyaan oo ay ansixiyaan Golaha Wasiiraddu Siyaasadda Qaran ee joojinta gudniinka hablaha sidoo kalena ay ka hawlgasho dhammaystirka siyaasadda gaar ahaan sidii ay u ansixin lahaayeen Golayaasha xeer-dejintu.

Dhammaad.